

# ICRC DA SOOMAALIYA

**Janaayo ilaa Disember 2015**

# XAQIIQOOYINKA IYO TIROOYINKA

## SUGNAANTA DHAQAALAHA



In ka badan **630,000** dad ah ayaa ka faa'ideystay qaybin deg dega ah ee cunto iyo agabyo kale. Caawinaadan waxaa ka mid ah jawaanada ciida lagu shubo si loo xoojiyo jiinka wabiga inta lagu guddo jiro xilli roobeedyada.

Ku dhowaad **500,000** qof ayaa ka faa'iday barnaamijyo la xiriira nolosha kaa oo lagu bixinayey gargaar lacageed iyo taageero dhanka beeraha: cagafyo, qalabka beeraha iyo xakameynta gendi.

## DHOWRISTA



In ka badan **4,200** ayaa lala gaaray adeegyo la xiriira xabsiyadda, Adeegyadan waxaa ka mid ah booqashooyin lagu kala bixiyey goobaha xabsiyadda si loo qiimeeyo xaaldaha iyo in la xaqiijiyo in maxaabiista loola dhaqmo si aadananimo iyo si sharaf leh. Gargaar caafimaad ayaa sidoo kale la siiyay qaar halka raashiin loo qaybiyay xarumaha laysku xiro inta lagu guda jiray bisha Barakeysan ee Ramadaanka.

## CAAFIMAADKA



Ku dhowaad **485,000** dad ah ayaa ka faa'idaystay caawinaad dawo tayo leh oo la gaarsiiyay Isbitaalada iyo xarumaha caafimaadka ee Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed xarumaha caacimaadka. Dayactirka adeegyada caafimaadka iyo tababarka shaqaalaha si sare loogu qaado tayadda daryeelka caafimaadka ayaa sidoo kale la qabtay. In ka badan 3,000 xaaladood oo caruur nafaqodarro xun qaba ayaa la kaalmeeyey.

## DIB U SOO CELINTA XIRIIRKA



In ka badan **70,000** qof ayaa lagu caawiyey inay dib ula xiriiraan qaraabadooda. Tani ayaa lagala kaashaday Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed iyadoo la isticmaalayo Fariimaha Laanqeyrta Cas (RCM), wacid taleefano iyo barnaamijka baafinta oo ay ku jirto magacyo oo laga aqriyo barnaamika dadka Maqan ee Laanta Af Soomaaliga ee BBC. Qaar ka mid ah dadka lagu caawinay adeegyadan waxaa ka mid ahaa muhaajiriin iyo dad ka soo cararay dagaalada Yemen.

## BIYAHA IYO DEEGAANKA



In ka badan **240,000** dad ah ayaa waxay heleen biyo nadiif iyo nadaafad wanaagsan ka gadaal markii la qoday ceelal riigeedyo, ceelal gacmeedyo iyo rakabida biyo qabatanida roobka.

## XEERKA CAALAMIGA EE AADANANIMADA



**624** saraakiil ciidan ayaa tababar waxbarasho ka helay macluumaad ku saabsan Xeerka Caalamiga ee Aadananimada iyo qoraalo ku saabsan habdhaqanka dagaalka xilliyada colaadaha hubaysan.

Warbixin dheeri ah fadlan booqo **www.blogs.icrc.org/somalia/so**

ICRC